**Kulanka Guddiga Maamulka Maaliyadda (FGC) – Nuxurka Guud**
**Kulankii 68aad – 6 Abriil 2025, Muqdisho, Soomaaliya**

## Guudmar

Guddiga Maamulka Maaliyadda (FGC) ayaa magaalada Muqdisho ku yeeshay kulankoodii 68aad 6da Abriil, 2025. Doodaha ayaa diiradda lagu saaray mudnaanta maamulka maaliyadda sida dib-u-eegista dastuurka oo la xiriirta arrimaha miisaaniyadda, maaraynta khayraadka dabiiciga ah, kor u qaadista dakhliga gudaha, maaraynta hantida guud, iyo warbixinno la xiriira qandaraasyada iyo heshiisyada. Xubnuhu waxay dib u eegis ku sameeyeen waxqabadyadii kulankii hore waxayna isla qaateen tallaabooyin lagu xoojinayo hufnaanta, isla xisaabtanka, iyo isku-dubaridka.

## Kor U Qaadista Dakhliga:

Xubnaha FGC ayaa dhegaystay warbixinno ku saabsan horumarka lagu sameeyay dib-u-habaynta dakhliga gudaha. Waxaana lagu falanqeeyay horumarka Dowladda Federaalka Soomaaliya (DF) ee ku aaddan adeegsiga nidaamyada casriga ah ee SOMCAS ee maamulka kastamyada ee dekedda iyo garoonka Muqdisho, iyo in DF si buuxda u qaadato hawlgalinta nidaamkaas. Sidoo kale, waxaa la bixiyay xog ku saabsan saamaynta dhaqaale ee ka dhalatay dhimista gargaarkii ay dawladda Maraykanku bixin jirtay.

## Hannaanka Dib-u-eegista Dastuurka:

Xubnaha guddida FGC ayaa ka dooday qodobbada Dastuurka ee ka baxsan cutubka miisaaniyadda (Cutubka 13aad) balse leh saamayn maaliyadeed, oo ay kamid yihiin: qaybsiga awoodaha iyo khayraadka, iyo madaxbannaanida hay’adaha dhaqaalaha sida Bangiga Dhexe iyo Xafiiska Hantidhowrka Guud. Waxaa la aqoonsaday arrimo muhiim ah oo ay tahay in la tixgeliyo si loogu daro wadahadalka dastuuriga ah.

## Maareynta Kheyraadka Dabiiciga ah:

Guddoonka FGC iyo xubnaha ayaa waxay ka hadleen horumarka Wasaaradda Batroolka ee dhammaystirka nidaamka sharciga ee batroolka, oo ay ku jiraan xeerar muhiim ah. Waxaa dib u eegis lagu sameeyay xaaladda Heshiisyada Wax Soo-saarka (PSAs), iyo tallaabooyinka Dowladda Federaalku ay qaadayso si loo xoojiyo maamulka qandaraasyada. Sidoo kale, waxaa la helay warbixin ku saabsan qorshaha 2025 ee rukhsadaha kalluunka nooca tuna, iyadoo siddeed markab la rukhsadeeyay sannadkan.

**Kormeerka Qandaraasyada iyo Heshiisyada:**

Xubnaha guddia FGC ayaa waxay dib u eegis ku sameeyeen horumarka DF ee diyaarinta tartamada qandaraasyada guud ee muhiimka ah.

**Maareynta Dhulka Dadweynaha:**

Guddigu wuxuu ka dooday sharciga hadda jira ee maareynta dhulka/hantida guud, isagoo xoogga saaraya baahida loo qabo in si cad loo qeexo siyaasadda ku saabsan iibka iyo kiraynta dhulka iyadoo la raacayo Xeerka Maamulka Maaliyadda Guud (PFM) iyo xeer-nidaamyadiisa.

**Warbixinta Maamulka Maaliyadda ee 2024 (FGR):**

Guddigu wuxuu ka dooday qorshaha bandhigga warbixinta FGR 2024 oo soo bandhigaysa shaqadii FGC ee sanadkii tegay iyo horumarka laga gaaray maamulka maaliyadda guud, dib-u-habaynta hay’adaha, iyo hufnaanta miisaaniyadda. Jadwalka bandhigga warbixinta iyo masuuliyiinta ku shaqada leh ayaa lagu heshiiyay intii lagu jiray kulanka.

**Gunaanad:**

Guddoonka guddida FGC, Wasiirka Maaliyadda, ayaa xusay doorka muhiimka ah ee guddigu ku leeyahay horumarinta ajandaha dib-u-habaynta maaliyadeed ee Soomaaliya iyo dhismaha adkaysiga hay’adaha. Xubnuhu waxay dib u xaqiijiyeen ballanqaadkooda ku aaddan hufnaan, maamul hufan, iyo wada shaqayn u dhaxaysa hay’adaha. Jadwalka kulammada soo socda ayaa sidoo kale la isla gartay iyadoo kulanku si guul leh kusoo xirmay.